

Ma jiraan waxyeellooyin gaar ah?

Waa wax caadi ah in xoogaa barar ah, guduudasho ama jilicsanaan ah ka yeelato meesha lagaa muday. Mararka qaarkood barar yar oo aan xanuun lahayn ayaa soo baxa, laakiin bararkaan ayaa badanaa ku baaba'a dhowr toddobaad gudahood. Waxyeellooyinka gaarka ah ee aadka u daran waa kuwo naadir ah laakiin waxaa ka mid ah qandho, madax-xanuun, dawakhaad ama daal, xanuunsasho iyo qanjirada oo barara.

Haddii aad dareento xanuun kadib markaad qaadato tallaalka, isticmaal paracetamol. Si taxadar leh u akhri tilmaamaha ku dul qoran dhalada ama baakadka oo qaado qiyaasta saxda ah ee loogu talagalay da'daada. Haddii loo baahdo, qaado qiyaas labaad 4 ilaa 6 saacadood kadib.

Haddii heerkulkaaga uu wali sareeyo kadib markaad qaadato qiyaasta labaad, la hadal GP-gaaga ama wac khadka caawimaada NHS ee bilaashka ah 111.

Haddii aad la kulanto waxyeellooyin gaar ah oo looga shakisan yahay tallaalka, waxaad kaga warbixin kartaa websaydka Yellow Card ama waxaad wici kartaa 0800 731 6789 (9am ilaa 5pm Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo la soo degaya Yellow Card. www.mhra.gov.uk/yellowcard

Hadda waa wakhti fiican inaad hubiso in dhammaan tallaalladaada ay kuu cusboonaysiisan yihiin

Tallaalka loogu talagalay dhalinyarada



Tallaalada NHS



Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaallada loogu talagalay da'yarta booqo www.nhs.uk/vaccinations ama <https://qrco.de/YoungPeopleImms>



Kama aadan daahin inaad qaadato qiyaasaha/doosaska laga yaabo inaad seegtay.

Warqadan waxaa soo saartay Hay'adda Ammaanka Caafimaadka UK.
© Crown copyright 2023. 1P 100K JULY 2023 (APS). Product code: YP3BG1SO Somali. UK Health Security Agency gateway number: 2023184.

Warqadda waxaa laga dalban karaa ama lagala soo degi karaa: www.healthpublications.gov.uk, adigoo wacaya: 0300 123 1002 (khadadka waxay furan yihiin 8am ilaa 6pm Isniinta ilaa Jimcaha).

Nuqullada buug-yarahaan ee ku qoran luuqadda Ingiriisiga ayaa la dalban karaa.

Nuqullada buug-yarahaan ee la turjumay ayaa la dalban karaa.



UK Health
Security
Agency

Tallaalka Td/IPV

ee xoojiyaha ah ee loogu talagalay da'a yarta oo ah 3 tallaalka oo la isugu geeyey 1



Markaad 14 jir tahay ama inta lagu jiro Sannadka 9aad ee dugsiga waxaad xaq u yeelan doontaa tallaalka xoojiyaha ah ee 3 la isugu geeyey 1 qiyaas tallaalkaas oo ka hortagga teetanada, gawracatada iyo dabaysha. **Tallaalka Td/IPV waxa uu xoojin doonaa difaaca jirkaaga ee cuduradan faafa kaas oo laga yaabo in ay hoos u dhaceen intaad soo koreysay.**

Muxuu tallaalkani iga difaacayaa?

T

Teetano

Teetanada waa cudur xanuun badan oo saameeya habdhiska neerfaha kaas oo sababi kara murqo xanuun, wuxuu sababi karaa dhibaato xagga neefsashada ah, waxna wuu dili karaa. Wuxuu yimaadaa marka jeermiska laga helo ciidda iyo digada ay jirka galaan iyagoo maraya meelaha maqaarka uu ka furan yahay. Cudurka teetanaha la iskuma gudbin karo.

D

Gawracatada

Gawracatada waa cudur halis ah oo inta badan ku bilaabma cune xanuun oo si dhakhso ah u sababi kara dhibaatooyin xagga neefsashada ah. Wuxuu dhaawici karaa wadnaha iyo habdhiska dareenka, oo markuu daran yahayna, wuxuu sababi karaa dimasho.

IPV

Dabaysha

Cudurka dabaysha waa fayras weerara habdhiska neerfaha kaas oo sababi kara curyaannimo joogto ah oo murqaha ah. Haddii cudurka uu beegsado murqaha laabta ama maskaxda, cudurka wuxuu sababi karaa dhimasho.

Qiyaasta xoojinta ah ee loogu talagalay dhalinyarada waxa loo yaqaan Revaxis, waxaad ka akhrin kartaa Buug-yeraha macluumaadka bukaanka www.medicines.org.uk/emc/product/5581/pil

Haddii la iga soo tallaalay teetanada, gowracatada iyo dabaysha markaan yaraa, weli miyaan ka difaacanahay?

Maya, waxaad weli u baahan doontaa qiyaas xoojin ah si aad u xoojiso difaaca aad hore u heshay.

Immisa qiyaasood oo xoojin ah ayaan u baahanahay inaan qaato?

Waxaad u baahan tahay wadar ahaan 5 qiyaasood oo ah tallaalka teetanada, gawracatada iyo dabaysha si aad u dhiso oo aad u ilaashato difaacaaga.

Waxay ahayd inaad qaadatay:



3-da qiyaas ee ugu horeeysay markaad ilmo yar ahayd



qiyaasta 4-aad

markii aad u dhaxaysay 3 iyo 5 sano jir, kani waa tallaalka xoojiyaha ee la qaato kahor waxbarashada dugsiga



qiyaasta 5-aad

waxaa la qaataa sanadka 9-aad (da'da 13 ilaa 14)

Ma u baahnaan doonaa qiyaaso xoojin ah oo dheeraad ah mustaqbalka?

Waxay u badan tahay inaad u baahnayn qiyaaso xoojin ah oo tallaalan ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad u baahato qiyaaso dheeraad ah oo tallaalada qaarkood ah haddii aad booqanayso wadamada gaar ama haddii aad dhaawacanto, waxaad u baahan kartaa cirbad kale oo teetano ah. Ka hubi kalkaalisada caafimaadka ee GP-gaaga.

Sidee la ii doonaa qiyaasta xoojinta ah ee tallaalka Td/IPV?

Waxaa 1 cirbad lagaaga duri doonaa cududaada sare. Qofna ma jecla duritaan, laakiin waa duritaan degdeg ah. Irbadaha la isticmaalo waa kuwa yaryar, waxaadna dareemaysaa keliya muditaan aad u yar. Haddii aad xoogaa ka baqayso in lagu duro, u sheeg kalkaalisada ama dhakhtarka kahor inta aan lagu durin.

Ma jiraan tallaalo kale oo ay tahay inaan hadda qaato?

Marka aad qaadanayso qiyaasta xoojinta ah ee tallaalka Td/IPV waxaad sidoo kale xaq u yeelan doontaa tallaalka MenACWY. Waa inaad tallaalkan qaadataa kahor inta aadan dugsiga ka bixin. La hadal kalkaalisada dugsiga haddii aad seegtay oo aad weli dugsiga ku jirto. Haddii aad ka tagtay dugsiga, waa inaad la xiriirtaa GP-gaaga si aad u qorshaysato inaad qaadato. Waa fikrad wanaagsan inaad ka hubiso dhakhtarka GP-gaaga in dhammaan tallaalada kale ay yihiin kuwo cusboonaysiisan oo ay ku jiraan tallaalada HPV iyo MMR (jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka).

Haddi aanad waligaa qaadan tallaalka MMR, waa inaad hadda qaadataa hal qiyaas iyo 1 qiyaas kale bil kadib si lagaaga difaaco jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka.

